

Wargeyska Mountain View

Febraayo 10, 2016

Isniin, Febraayo 15.....Ma Jiro Dugsi, Maalinta Madax Weynaha
Talaado, Febraayo 16.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:15 a.m.
Qamiis, Febraayo 18.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:30 p.m.

Fariinta Agaasimaha

Hal taxadi uu dugsigena la kulmo muddo sanooyin badan waa baaburta ku badan meelaha baabuurta la dhigto iyo Navajo Street subax kasta iyo galab kasta marka dugsiga bilowdo iyo marka laga rawaxo dugsiga maalintii. Waxay noqotaa xaalad halis ah bacadamaa wadeyaal badan isku qaataan labo boos oo baabuurka la dhigto, xawaaare uga baxaan iyaga oo aan fiirinin, iyo iska indho tiraan calaamadaha iyo meelaha laga gudbo jidadka. Sidoo kale waa halis marka ardayda loo diro (ama iskooda u doortaan) in ay socod/orod ku maraan meelaha baabuurta la dhigto badalkii ay isticmaali lahayeen meelaha laga gudbo jidka, ka gudbaan jidka meel aan loogu talogalin in laga gudbo, iyo in ay orod ku maraan baabuurta hortooda.

Waxaan raadiyaa dad iskaa wax u qabso ku shaqeeyo oo naga kaalmeeyo xaaladaan iyaga oo ardayda ku kaalmeeyo in ay ka gudbaan meelaha laga gudbo Navajo Street inta u dhexeyso Dugsiga Hoose Mountain View iyo Dugsiga Dhexe Glendale. Waxaan kaloo raadiyaa dad ku shaqeeyo iskaa wax u qabso oo naga kaalmeeyo socodka kooxaha ardayda yimaada dugsiga si ay u sameyaan waxa lagu magacaabo baska socodka dugsiga. Waa halkaan meesha waalidiinta iyo caruurta socodka ku yimaada dugsiga u ogolaadaan ardayda in ay ku soo biiraan kooxda si loo sameeyo koox balaaran, wada socota, oo ammaan ah.

Haddii aad doontid in aad kaalmo ka geysatid mid ka mid ah labaadaan fursadood, fadlan ogeysii xafiiska hore. Horay ayaad ugu mahadsan tahay kaalmada aad ka geysatid ammaanka ardaydena.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Febraayo 16, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Qalabka Elataroonigga

Waxaan codsaneynaa in ardayda aysan telefoon ama qalab elataroonig ah u soo qaadanin dugsiga. Marka la keeno dugsiga, waxay sii jeediyaan ardayga keenay elataroonigga iyo asxaabta ardaygaas. Marka qalabka elataroonigga, sida telefoonada, lagu arko ama laga maqlo dugsiga, waxaa lagu wareejin doonaa xafiiska. Marka kowaad oo laga qaado ardayga, waxaa loo soo celin doonaa ardayga marka la gaaro dhamaadka maalinta. Mararka xiga ee elataroonigga loo diro xafiiska, waxaa loo soo celin doonaa oo keliya waalidka/ilaaliyaha ardayga.